# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:07 AM** **Hansard No.23/04** **Kal-fadhiga 23aad**

**Fadhigii 16aad** **Taariikhda *20/01/2014***

## Dooda Xeerka Komishanka Xakameynta HIV/AIDSka ooh al maalin socotey kana qeyb-qaateen 9 Mudane.

**Gudoomiyaha:-** Waxaynu u balansaneyn Dooda Xeerka Komishanka Xakameynta HIV/AIDSka oo Mudanayaashu shaley isu qoreen doodiisa, Markaa waxaynu galeynaa Doodii Xeerka, Waxaana ku soo dhoweynayaa Mudayaasha.

1. **Md. C/raxmaan Yuusuf Cartan:-** Qabyo Qoraalka Xeerkan Komishanka Xakameynta HIV/AIDska markaan akhriyay waxaad moodaa Xeerku inuu ka hadlayo oo kaliya Qaab dhismeedkii Komishanka oo kaliya.

**Gudoomiyaha:-** waa establishmentkii Hay'adda Xeerku oo Xeerkii policygu wuu dhimanyahay baan u maleynayaa.

Gudoomiye hadaad Bilowga Xeerka aad eegto waxaa ku qoran khatarta dhabta ah ee dadka Somaliland ku wareegsan ee ka imanaysa faafidda HIV/AIDS, Markuu ogaadey baahanyahay dhismaha hay'ad Qaran oo u faradhuudhuuban ka hortagga iyo xakamaynta cudurka HIV/AIDS-ka, dawaynta iyo daryeelka dadka xanuunka la nool; Wacyigalinta iyo baraarujinta bulshada JSL iyo la macaamilka ururada ku hawlan wax ka qabadka HIV/AIDS-ka, Marka Xanuunkan waxaa ku waageeran waxyaabo dhinaca policy ah iyo waxyaabo dambi (criminal) noqon kara.

Markaa aniga waxay ila tahay in xeerkan lagu asaaasayo Gudidda ay qodobo sharci oo ku wajahan Xanuunkan lagu soo daro oo ay ka mid tahay daryeelida dadka la nool xanuunka oo ay kow ka tahay qofka la nool xanuun aan la takoorin, sidoo kale ay ka mid tahay in xukuumadu diyaariso dawadiisa, iyo mawduuca ah in lala socdo faafidiisa oo hadii xanuunkaasi yahay xanuun faafayo la eegayo siduu u faafayo oo u soconayo.

Gudoomiye Gudiddani hada waxay dhisantahay ilaa 8 sanadood oo madaxweynaha ayaa komishanka Madax ka ahaa, Markaa intaas oo dhan in manta laga hadlo uun qaab dhismeedkeedii oo aan la soo raacsiin waxyaabihii

danbiga keenayay, Markaa waxaa loo bahan yahay in lagu soo daro qodob ah Maxaa laga yeelayaa ama Ciqaabta qofka xanuunka isagoo qaba oo dawadii qaata dadka qaadsiiya ama isagoo positive ah si ula kaca u guursada qof aan war heynin, ama nidaam sharci daro ah ula macaamila, waa in Ciqaabtiisa qofkaa Xeerkan lagu muujiyaa.

Waxaa kaloo jira oo inagu waageeran dalalka deriska inala ah sida Kenya, itoobiya iyo Djabuuti Xanuunkani aad buu u aafeeyey xuduuduhuna way u isu furan yihiin, caalamka hadii xanuunkaa laga helo dalkaagaa laguu soo masaafurinayaa, inaga waxaa jira in dad ajaanib ahi ay ka qaataan dawada dhaktaradeena, dadkaasi oo xataa aan la weydiinin maxay ku nool yihiin ama dhaqaaluhu xaguu ka soo galaa, hadeynaan awood u lahayn ineynu test ka qaadno dadka meelaha dalka laga soo galo ee Garoomada dayuuradaha, waa ineynu qaabkii kale ee aynu u xakameyn laheyn Xeerkan ku muujinaa.

Waxaa jira iskaashi Xaga Xanuunka ah oo tusaale ahaan qofka itoobiyaanka ah ee qaba hadii uu Jabuuti qabto in hay'adda ee waxan qaabilsani ay ka war heyso oo dawadiisa sii siiso dabadeetana sharcigaa dalkaa lagu xukumo.

**Markaa aniga waxay ila tahay Gudoomiye:-**

- Inuu Xeerku inaga baxo qaab dhimeedka kaliya iyadoo hay'addii dhisaneynd 7 sano, dadkiina dawo qaadanayo oo bulshadii ku dhexnoolyihiin arrintaasi waxay inagu noqoneysaa Xilkasnimo, waxaynu u baahanahay inaynu 3 qodob xeerka ku darno oo kala ah:-

✓ *Daryeelka Qofka Xanuunka qaba.*
✓ *Qofka xanuunka qaba ee ku talaabsada inuu qof kale u qariyo ciqaabtiisa.*
✓ *Dadka ajaanibka ah ee Xanuunka qaba iyo dawlahada dariska ah sideynu ula macaamileyno.*

2. **Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-** runtii sidaa la sheegey Xeerkani wax badan buu u baahanyahay in lagu daro, mar haduu Golihii horyaalona in wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyaa waa muhiim, Gudiddu warqad bay soo sameeyay, wixii muhiima in la isla qaato weeye, tusaale ahaan sida Xildhibaanku sheegey dadkaas xanuunka qaba markey safar u baxayaan iyo markey dalka imanayaanba in Xogtooda la helo waa mid aad u muhiima oo lala socdo, qofkii oo xanuunka qaba hadii uu safar galo oo Gobol kale tago koley in xogta la hayo si loo xakameeyo waa loo baahanyahay.

**Qodobka 18aad F.2aad** waxaan leeyahay sidaa Xukuumadu ku soo gudbisey buu sax ku yahay wixii Dastuurka ka hor imanayaana waa waa null and void, Markaa Marka xeerka la saxo ha la ansixiyo, waadmahadsantihiin.

3. **Md. Axmed Maxad Diiriye (Nacnac):-** Sida Md. C/raxmaan sheegey Xeerkani wuxuu u baahan yahay in lagu karatiimeeyo dadka Xanuunkan qaba waayo bari dhoweyd waxaa la sheegayay nin yimi oo xanuunkan qaba oo 8 dumara qaadsiiyay sidoo kale gabadh sidaas oo kale ah ayaa la sheegayay, Markaa waa ineynu Xeerkaa ku xakameyo oo u sameyno wax sharciya oo dadkuna ku badbaadaan.

   **Qodobka 13aad** ee Magacaabista Shuruudaha Agaasimaha Fulinta iyo Agaasime Waaxeedyada waxaan soo jeedinayaa in sidii uu xukuumada uu kaga yimi loo daayo waayo oo sida Gudidda aynu ka deyno

4. **Md. Baar Siciid Faarax:-** horta waxan eynu ka hadleynaa waa cudur aafo ah oo dadka iyo dalka aafo ku haya, xeerkanina waa qaab dhismeedkii Maamulilahaa komishanka, dadka ku qoran ee madaxda looga dhigeyna waa dad aad u mashquula inkastoo uu agaamise leeyahay, Wasiirka Caafimaadka iyo Madaxweynahaba Hawshoodu way badan tahay inkastoo ay labaduba ku fiican tahay iney ogaadaan oo la socdaan, Markaa waxaan ku soo dari lahaa dadkale oo uga faro-dhuudhuuban, waayo sida Xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen waxaa jira rag dibadaha ka yimi oo reero gabdho weydiistey iyagoo cudurkaa qaba oo og dabadeedna hablihii la siiyay dadka dibida ka yimaadana aad baa loogu dhag taagaa.

   Markaa waxaa jirta in xakameyntii aaney ku jirin Xeerkan, ninka intuu reerkii u yimi dabadeedna gabadhii dhimatey isaga war uma hayee, waxaan kaloo ogahay nin kale oo u kireysan yaha Guriweyn oo habeenkasta intuu gabadh doono meelahaa wuxuu helo ka soo kaxeysta lacagna heysta maqaan lacagtaa meel uu ka keeno eh, Markaan gudidii wareystay oo weydiiyay waxaas oo dhan way jiraan oo wax la ogyahay oo kaas gurigu u kireysan yahay wuu jiraa oo hablaha lacag buu ku kaxeystaa, Markaa cudurkii waxaad moodaa inuu dalka ku sii kordhayo dalka, sidaa darted waxaan odhan lahaa dadka hawshan ka hortaga iyadoo Wasiirka Caafimaadka iyo Madaxweynaha aan laga saareyn in dad uga sii faro-dhuudhuuban aynu ku darno oo arrinkaa si xooga halooga hortago, waana iney jiraan dadkan cudurka dadka qaadsiinaya wax qabanaya, waayo qofkii waa qof wax diley oo qofka xabada iyo tooreyda wax ku dila kama duwanee.

   **Markaa waxaan soo jeedinayaa:-**

- Xeerkan ha lagu soo daro Qodob adag oo xakameynaya oo ka hortagaya, dadkana dee Xanuun ha qabana waa sharci talaabo ka qaadaya uu jiraa, waadmahadsantihiin.

5. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** Cudurkani aafo caalami ah, inagana wuu ina saameynayaa oo aafo qaran buu inoo yahay, waxa weeye aafadan qarana in laga hortago Xildhibaanadii iga horeeyay talooyinkey soo jeediyeen oo dhana waa ku raacsanahay oo sekentment gareynayaa, Xeerkan maaha Xeer dhameystiran oo kolna waa policygii, halka Astaanta ku qoran waxbaan ka badali lahaa oo halka hoose in lagu qor Gudidda Qaranka Somaliland ee HIV/AIDska oo la iskaga horgeeyo tan ingriisiiga ah inta banaan ee calaamada oo iyadoo sidaa afsomaliga ah lagu qoro oo ay iska horyimaadaan, HIV uu u dhexeeyo labada luuqadood oo dhexdooda la lagaliyo.

   Halka Gudidda Agaasinka iyo Golaha Hagida ah, Xeerka laguma Xusin in Gudidda Agaasinku inay yeelanayaa wax shir ah, Markaa waa in lagu daro Xeerkan iney yeeshaan Shir bille ah Gudidda Agaasinku si ay uga wada hadlaan wax soo kordhey, sidu u socdo iyo sidii hawluhu ugu qabsoomeen ama ugu qabsoomayaanba, Markaa Xeerkan halagu soo daro shirarkaa billaha ah ee yeelanayaa Gudidda Agaasinku oo uu gudoominayo Agaasimaha Fulintu, Xogheyna ay noqoneyso xogheyntiisa gaarka ah ee Xafiisku.

   **Qodobka 4aad F/1aad** ee Ujeedooyinka Komishanka Qaranka ah, halka "Dejinta siyaasaddaha iyo hagayaasha lagaga jawaabayo fiditaanka cudursidaha/cudurka HIV/AIDS iyo hab-maamulka cawaaqibkiisa ee dalka JSL" waxaan ku dari lahaa Hagaajinta, Xakameynta iyo ka hortagida HIV/AIDska oo aan ka dhigi lahaa ***"Dejinta, Hagaajinta, Xakameynta iyo ka-hortaga siyaasaddaha iyo hagayaasha lagaga jawaabayo fiditaanka cudursidaha/cudurka HIV/AIDS iyo hab-maamulka cawaaqibkiisa ee dalka JSL"***

   Halka kalmada ***Komishanka*** waa kalmad ingriisi ah, Markaa anigu waa in laga dhigo **"Gudidda"** oo afsomali loo isticmaalo**,** si loo yidhaahdo Qaab-dhismeed Gudidda, sidoo kale Qodobka 10aad waxaan ku deyn lahaa sida Xeerka ku qorneyd waayo waa Gudiddii Hagida ee Maaha Agaasinkii, Markaa Halkaa Gudiddu tidhi Agaasimaha Fulintu Wakiil ha ka noqod anigu Wasiirka Caafimaadkaan ku deyn lahaa, laakiin Agaasimaha Fulintu wuxuu wakiil ka yahay Fulintii iyo hawlihii kale oo dhan isagu hawlwadeenaduu Wakiil ka yahay oo qeyb ka mid ah Komishanka, Markaa intaas ayaan ku soo koobayaa anigu.

6. **Md. Ibraahim Caraale Cabdi:-** run ahaantii Xeerkan horteena yaala ee Magiciisa la inoogu soo gudbiyay Xeerka Gudidda Komishanka Qaranka ee Xakameynta HIV/IADSka waa Xeer muhiima oo ka hortagayo aafo runtii aduunweynuhuba ka qeyliyay, aafada marka ugu horeysa wax lagu xakameeyo waxa ugu weyn oo asal u ah Xanuunkan waa sinada, iyado waxyaabo badan oo kale oo ay ku fido ay jiraan, markaa waxaan bulshada u jeedin lahaa mar hadii bahalkan asaas ay u tahay sidanu Ilaahey Jala Wacalaa wuxuu Yidhi "ha u dhowaanina Sinada, xumo iyo cadho weeye iyo dariiq la maro kii ugu xumaaye" markaa markii dariiqii la yidhi waa sidaa la marey ayaa xanuunadan dawadoodii lagu dhibey ku dhaceen.

   Intaa markaan ka Gudbo, Xeerkan sida Magaciisa ka muuqata Waxaan taageeri lahaa sidan Gudiddu u soo jeedisey oo ah in Xeerkan Magaciisa laga dhigo Xeerka Aasaaska Komishanka Qaranka ee Xakameynta ay AIDsk, maadaama lagu aasaasayo Komishan Qaran oo ka shaqeeya la dagaalanka iyo xakameynta HIV/AIDska, sida laga dhawaajiyeyna Xeerkii weynaa wuu dhiman yahay ee kani waa Xeerkii lagu asaasayay komishankaa oo hada shaqeeya Madaxweynuhu soo magacaabey.

   Sida Gudidda soo jeedimohooda ka muuqata, komishanka kale oo badan oo aan komishankan aheyn buu madaxweynuhu magacaabey, Golahana la horkeeney, Markaa **Qodobka 13aad** ee Magacaabista Shuruudaha Agaasinka Fulinta iyo Agaasime Waaxeedyada, oo Gudidduna wax ka soo badashey, anigu waxaan odhan lahaa Qodobka sidii uu uga yimi Xukuumada ayuu sax ku yahay, Muxuu kga duwanyahay komishanada kale, nimankii waa komishankan hana xabad ha laga soo reebo inta kale ama shaqaaleyso ama ha erido.

   Sax bay ahaan laheyd hadii Gudiddu soo jeediso in Komishanku iska dhex doorto Gudoomiyohooda, markaa iyago komishan qaran ah, iminka ay madaxweynaha hoos tagaan maxaa loo diidayaa inuu wada magacaabo, markaa aniga sidaasi sax ilama ah, waxaana taageersanahey Sidii uu kaga yimi Xeerku Madaxweynaha, waxa kaliya ee ay komishanada kaga duwanaadeed halkii ay iyagu is dooran lahaayeen madaxweynihii baa magacaabay laamihii kala duwanaa, si toos ahna isagey u hooos tagaan.

7. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** Xeerka ina horyaala marka hore waxaan u arkaa inuu yahay Xeer aad u muhiima, inkastoo aanu xeerkii xakameyntu aanu ina hor oolin oo xeerkii aasaaska Gudiddu ina horyaalo, markaa waxaynu ku koobanahay waa qaabkii iyo aasaaskii loo sameynayay

komishankan, Komishanaduna qaabkey inoogu yimaadaan waa qaabkaa oo madaxweynahaa Magacaaba, inagu waxaynu leenahay ansixinta.

Waxaa runtii ay tahay in horta la soo horeysiiyo oo bulshada u wanaagsan Xeerkii Xakameynta, Markaa waxaan ku talin lahaa, in Xeerkii xakameyntana la soo raaciyo si aynu mar isuwada raacino oo Golahan ugawada baxao, hadaan Xeerka guda-galo wuxuu u baahan yahay in mar hadii la yidhi maamul in Gudidda la habeeyo oo la nidaamiyo, Xeerkan waxaad moodaa in qaab-dhimeedku ka khaldan yahay, Komishanadii aynu hore u ansixin jirney Gudiddani uma eka, waa ka kooban Gudi Heer Qaran oo wada Wasiiro ah, waxaynu u baahanahey sida Gudidda Xuquuqan insaanka oo kale gudi umada u shaqeysa oo shaqadooda u madaxbanaan ineynu sameyno ayaynu dooneynay, Markaa Gudiddan Wada wasiirada ah inaaney waxba qaban Karin oo shaqadoodii ay cusleysay.

Markaa waxaan soo jeedin lahaa **Qodobada 5aad iyo 6aad** in la badalo, oo laga dhigo Gudi shaqeysa oo lagu asaaso Xeerkan, kana kooban 7 xubnood oo madaxweynuhu soo magacaabo Goluhuna ansixiyo, Markaa labada Qodob in sidaa loo badalo ayaan qabaa,  sidoo kale kuma cada halkan muda Xilka ee Gudiddu, markaa iyadana mudo cayiman in loo sameeyo weeye, 7 xubnahaasna sida loo soo xuley maaha mid adag, waxa ka mid noqonaya wasaaradaha Xidhiidhka la leh Xanuunkan ee ah Wasaaradaha Caafimaadka, dhalinyarada iyo Ciyaaraha iyo Warfaafinta, Xubnaha inta kalena ka timaado hay'addaha iyo dadweynha iyagu markaa xogta haya.

Sida si lamida waxaa isla badali doona **Qodobka 11aad** ee Xilka iyo waajibaadka oo wuxuu isla badali doonaa marka la badalo Qodobadaa hore, oo qaabkii xilka iyo waajibaadku qaab kan ka duwan ayuu ku saleysnaan doonaa, Gudidda wixii ka farcamaana wuxuu noqon doonaa shaqaalohooda ama agaasin ha lagu magacaabo ama waaxo eh iyaguu hoos imandoonaa iyagaana u madax banaan shaqaalohooda sidey u qaadanayaan, waxaad moodaa Xeerku inuu shaqo siiyay oo kaliya Agaasin, halkan waxaynu ku ansixineynaana waa Gudi, Markaa in shaqadii aynu xeerka ku ansixineynay uu agaasin qabto iyo gudi qabato isma waafaqeyso, markaa waa in labadaana la kala daayo.

**Qodobka 9aad** isna wuxuu isla badalaayaa qaabka cusub ee Qodobadaa hore loo badalayo, Markaa anigu waxaan odhan lahaa warbixinta ku qoran iney Gudidaasi bixinayaan maadaama ay shaqo qaran tahay in Sanadkiiba mar ka akhriyaan Golaha ayaan soo jeedinayaa iyana ee isna ku xusan **Qodobka 20aad**, markaa sida Gudidda Xuquuqal insaankuba warbixintooda sanad laha

ah Golaha ugu soo gudbinayaan iyana waa iney sanad kiiba mar Golaha u soo gudbiyaan warbixintooda.

**Qodobka 26aad** ee ugu dambeeya, waxaa ku qoran "**Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa todoba cisho ka dib maalinta lagu soo saaro faafinta rasmiga ah**" markaa waa khalada waxa weeye **"wuxuu dhaqangalayaa marka labada Gole ee Baarlamaanku ansixiyo, Madaxweynuhu saxiixo faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro"** qaabkaas ayuu noqonayaa, intaas ayaan ku soo koobey, waadmahadsantihiin.

8. **Md. C/laahi Xuseen Cige:-** Xeerkan ina horyaala Gudidduna ka soo shaqeysay Waa Xeer dalka muhiimad balaadhan ugu fadhiya, aafadan dalka iyo aduunka ku cusubna ay tahay ineynu wax badan ka nidhaahno, runtii qodob kooban ayaan wax yar ka odhan lahaa, sida Xildhibaano iga horeeyay soo jeediyeenba komishankan iyo Agaasinkan kuwada yaala in hal mid kaliya lagawada dhigo oo uu Komishan kaliya noqdo, madaama Madaxweynuhu uu Gudoomiye ka yahay waxaan qabaa looma baahna Gudiddan kale ee Hagida, waayo wasaaradohoodii baa culeys ka saran yahay.

   In Xeerka lagu koobo Komishan 7 xubnood ah Wasaaradaha Caafimaadka iyo Warfaafintu ay Xubno ku yeeshaan inta kalena ay noqoto xubnihii Gudidan fulinta lagu sheegayay ee Madaxweynuhu Gudoomiyaha u yahay, Wasaaraduhuna maadaama ay xubno ku leeyihiin.

   **Markaa waxaan Soo jeedin lahaa:-**

   - Si ay hawshan u koobnaato oo baaxadeeda cid gaara loogu ogaado waa in laga dhigaa Komishankan 7 xubnood oo laba xubnood ay ku kala yeeshaan Wasaaradaha Caafimaadka iyo Warfaafintu, 5ta kalena noqdaan Agaasinkaa fulinta ee Xeerku sheegayo, sidoo kale wakhtigooda in la mudooyo waan qabaa, Sanadkastana Warbixintooda Golaha ka hor akhiryaan.

9. **Md. Maxamed X. Xuseen Ciise:-** Xeerkani horta waa asaas oo Hay'addan komishanka HIV/AIDska ayaa lagu asaasayaa, anigu principle ahaan Soo jeedintii Gudidda waan ku taageersanahey, waxaan ku darayaa waxaad moodaa hay'adan iyo Magacu iney iskhilaafsan yihiin oo markaad eegto ereyga komishan sidey u naqaaney wuxuu ahaa Gudi madax banaan oo sida komishanka Xuquuqal inkaana oo inta la magacaabo iyagoo wada socda iyagu

Gudoomiye iska dhex doorta, laakiin kani wuxuu u sameysan yahay qaabka sida Hay'adda ka hortaga Masiibooyinka ee NERAD oo kale.

Markaa Waxaaan soo jeedinayaa in laga daayo Magacan oo la yidhaahdo **Hay'adda HIV?AIDSka Qaranka**, madaama ay tahay hay'add la mida NERAD oo kale oo aaney aheyn Komishan, waayo hadaad eegto Qaab-dhimeedkeeda hay'addani Komishan maaha, **Qodobka 5aad** wuxuu noqonayaa markaa Qaab-dhismeedka Hay'adda HIV/AIDSka, **F/1aad** Heer Qaran buu noqonayaa baa ku qoran oo wuxuu noqonayaa Golaha Hagidda, iyo Agaasinka Fulinta.

Markaa halkaa khalad baa ku jiroo waxay noqoneysaa tusaale ahaan Sida hay'adda NERAD oo kale waxay leedahay Gole Hagid bey leedahay, Golahaa waxaa u Gudoomiye ah Madaxweyne ku-xigeenka hoostana waxay leedahay qeybtii fulinta oo waaxyeheedii kala duwanaa leh, markaa qaabkaa oo kale in loo daayo oo laga dhigo ---------------Cont'

***The house Adjourned at 11:23 AM by the speaker of the house***

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------- | ------------------------------------------ |